

DPR lamb. 7 ee 10 Jannayo 1962

Wakiilashada saxiixa ee Madaxa Waaxda

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 85 ee Dastuurka.

Kadib markii la arkay dekreeto lamb 78 ee 18 Maay 1956.

Kadib markii la garoowsaday in loo baahan yahay in Wasiiraduhu ay u wakiishaan Madaxda Waaxyada in ay saxiisaan qoraalaha la xiriira kharajyada joogtada ah (mushaaraadka iyo gunnoyinka).

Kadib markii la dhegeystay Golaha Wasiiradaha.

Kadib talo soo jeedinta Rai'sul Wasaaraha.

WUXUU XEEREYAY

Wasiiraduhu waxay si joogta ah awood u leeyihin in ay wakiishaan Madaxda Waxyaha ka hoos shaqeeyo – mid kasta iyadoo loo eegayo howshiisa u gaarka ah- in uu saxiixo qoralladda la xirira kharajyada joogtada ah (mushaaraadka iyo gunnoyinka) iyo howlaha caadiga ah ee maamulka.

Muqdisho, 10 Janaayo 1962.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirashid Cali Shermarke

Waa la arkay waana la diiwan geliyey- diwaan lamb1 bogga 12

Muqdisho, 24 Janaayo 1962.

Xisaabiyaha Guud: **Dr. Ahmed Dahir**